

Magaca Hore Ee Bukaanka											
Magaca Dambe Ee Bukaanka											
Taariikhda Dhallashada			Cinwaanka Bukaanka						Jinsiga		
<input type="text"/> / <input type="text"/> / <input type="text"/> <small>BISHA MAALINTA SANNADKA</small>			Waddada _____ Guriga _____ Magaalada _____ Gobolka _____ Koodhka Boostada _____						<input type="checkbox"/> Labb <input type="checkbox"/> Dheddig		

Waxaan codsanayaa in macluumaadka caafimaadka khuseeya daryeelkayga iyo daaweyntayda loo galo sida loogu sheego foomkan. Waxaan dooran karaa haddii aan u oggolaanayo ama aanan u oggolaanaynin ka Qayb qaadashada Daryeel bixiyayaasha iyo Lacag bixiyayaasha HEALTHeLINK ("Kaqaayb qaatayaasha") ku lug leh daryeelkayga si aan uga helo gelida diiwaanadayda caafimaadka tooska ururka isdhaafsiga macluumaadka caafimaadka ee lagu magacaabo HEALTHeLINK. Haddii aan oggolaado, diiwaanadayda caafimaadka ka ahaada meelo kala duwan halkaas oo aan ka helo daryeelka caafimaadka waa la geli karaa ayada oo la isticmaalayo shabakada internetka kombuyuutarka waddanka oo dhan ah. HEALTHeLINK waa urur aan-faa'iido-doon ahayn midkaas oo dadka ula wadaaga macluumaadka ku saabsan caafimaadka dadka kale si eliktaroonig ah oona kasoo baxa heerarka dammaanada iyo khusuusiyaada ee HIPAA iyo Sharciga Gobolka New York. Si aad u oggaatid wax baddan ka booqo bogga internetka HEALTHeLINK halkan <http://wnyhealthlink.com/>. Doorashada aan ku sameeyo foomkan ma ahaan DOONTO mid saamaysa awoodayda aan ku helo daryeel caafimaad. Doorashada aan ku sameeyo foomkan UMA oggolaanayso dadka bixiya ceymiska caafimaadka in ay galaan macluumaadkayga midaas oo ay u galaan u jeedo ku saabsan go'aansashada haddii la i siinayo ceymiska caafimaadka ama la bixinayo biilalkayga caafimaad.

D O R O K A L I Y A H A L	Doorashadayda Oggolaanshaha. Kaliya HAL khaanad ayaa la saarayaa calaamada saxda ah ee ku yaala bidixda doorashadayda. Waxaan buuxin karaa foomkan hadda ama mustaqbalka. Sidoo kale waxaan bedeli karaa go'aankayga wakhti kasta aniga oo buuxinaya foom cusub.	
	<input type="checkbox"/> 1. HAA	WAXAAN OGGOLAANSO U SIINAYAA dhammaan Kaqaayb qaatayaasha hadda iyo mustaqbalka ah, kuwaas oo ku lug leh daryeelkayga, in ay ka galaan DHAMMAAN macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah tooska HEALTHeLINK.
	<input type="checkbox"/> 2. HAA, AAN KA AHAYN SI GAAR AH KAQAAYB QAATAHA (KAQAAYB QAATAYAASHA)	WAXAAN OGGOLAANSO U SIINAYAA dhammaan Kaqaayb qaatayaasha hadda iyo mustaqbalka ah, kuwaas oo ku lug leh daryeelkayga, in ay ka galaan DHAMMAAN macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah tooska HEALTHeLINK, AAN KA AHAYN Kaqaayb qaatayaasha hoos lagu qoray. Magaca Kaqaayb qaataha (Xafiiska Daryeel Bixiyaha): _____ Lambarka teleefoonka ama cinwaanka kaqaayb qaataha: _____ <table border="1" style="width:100%; height: 20px; margin-top: 5px;"></table>
	<input type="checkbox"/> 3. HAA, AAN KA AHAYN SI GAAR AH KAQAAYB QAATAHA (KAQAAYB QAATAYAASHA)	WAXAAN OGGOLAANSO U SIINAYAA KALIYA Kaqaayb qaataha (Kaqaayb qaatayaasha) gaarka ah ee hoos lagu qoray in ay ka galaan DHAMMAAN macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah tooska HEALTHeLINK. Magaca Kaqaayb qaataha (Xafiiska Daryeel Bixiyaha): _____ Lambarka teleefoonka ama cinwaanka kaqaayb qaataha: _____ <table border="1" style="width:100%; height: 20px; margin-top: 5px;"></table>
	<input type="checkbox"/> 4. MAYA, AAN KA AHAYN HADDII AY JIRTO XAALAD CAAFIMAAD DEG-DEG AH	WAXAAN DIIDAYAA IN AAN OGGOLAANSO U SIIYO AAN KA AHAYN HADDII AY JIRTO XAALAD CAAFIMAAD DEG-DEG AH Kaqaayb qaatayaasha hadda iyo mustaqbalka ah in ay ka galaan macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah tooska HEALTHeLINK.
<input type="checkbox"/> 5. MAYA, XITAA XAALADA AY JIRTO XAALAD CAAFIMAAD DEG-DEG AH	WAXAAN DIIDAYAA IN AAN OGGOLAANSO U SIIYO Kaqaayb qaatayaasha hadda iyo mustaqbalka ah in ay ka galaan macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah tooska HEALTHeLINK u jeedo kasta oo ay ka rabbaan, xitaa haddii ay jirto xaalad caafimaad deg-deg ah.	

Anigu waan fahansanahay in macluumaadkayga la geli karo haddii ay jirto xaalad caafimaad deg-deg ah, aan ka ahayn haddii Aan buuxiyoo foomkan oona saaro calaamad sax ah khaanada lambarka 5, midkaas oo sheegaya in aan diiday oggolaanshaha xitaa haddii ay jirto xaalad caafimaad deg-deg ah.
 Anigu waan fahansanahay in haddii aan codsado, HEALTHeLINK looga baahanyahay in ay i siiyaan liis ku qoran ka shifaada macluumaadkayga caafimaadka eliktarooniga ah midaas oo waafaqsan shuruudaha foomkan. Su'aalaha ku saabsan foomkan waa laga jawaabay anigana waxaa la i siiyay nuqul ku saabsan foomkan haddii aan codsado.

Sixiixa Bukaanka ama Wakiilka Sharciga ah ee Bukaanka

X _____

Taariikhda Sixiixa

/ /
BISHA MAALINTA SANNADKA

Qor Magaca Wakiilka Sharciga ah ee Bukaanka (haddii la heli karo)

Xiriirka uu la leeyahay Wakiilka Sharciga ah Bukaanka (haddii la heli karo)

Waalidka Wakiilka/Matalaha Healthcare
 Masuul Qofkale _____

Khaanadaan Waa in uu Buuxiyoo Kaliya Daryeel Bixiyaha	Markhaatiyayaal*
_____	*Loo baahanyahay haddii AAN lagu buuxinayanin foomkan xafiiska Kaqaayb qaataha.
_____	Qor magaca qofka Markhaatida ah _____ Sixiixa qofka Markhaatida ah _____
Oggolaanshaha Hay'ada Waxaa Laga Helay	Xiriirka uu qofka Markhaatida ahi la leeyahay Bukaanka (tusaale ahaan., ninkaaga/xaaskaaga, wiilkaaga, deriskaaga, iwm.)

Faah-faahino ku saabsan macluumaadka bukaanka ku jira HEALTHeLINK iyo hawsha oggolaanshaha.

1. Sida loo isticmaalayo Macluumaadkaaga. Ayada oo ay jirto ka reebitaano xadidan, haddii aad oggolaato, Kaqayb qaataha(kaqayb qaatayaasha) aad u oggolaato waxay isticmaali karaan macluumaadkaaga caafimaadka eliktarooniga ah kaliya si ay ugu isticmaalaan adeegahaan healthcare ee soo socda:
 - Adeegaha Daaweynta. Kuwaas oo ku siinaya daaweyn caafimaad iyo adeego la xiriira.
 - Xaqiijinta U qalmiitaanka Ceymiska. Waxay baaritaan ku samaynaysaa haddii aad haysatid ceymis caafimaad iyo waxa uu ceyminayo.
 - Hawlaha Maaraynta Daryeelka. Kuwaan waxaa kamid ah in laguugu caawiyo helida daryeel caafimaad munaasab ah, wanaajinta tayada adeegaha adiga lagu siiyo, isku duwida bixinta adeegaha daryeelka caafimaadka baddan kuwaas oo adiga lagu siiyo, ama in laguugu caawiyo raacida qorshaha daryeelka caafimaadka.
 - Hawlaha Wanaajinta Tayada. Qiimeyn iyo wanaajin lagu sameeyo tayada daryeelka caafimaadka adiga lagu siiyo iyo dhammaan bukaanada.
2. Maxay yihiin Noocyada Macluumaadka Adiga kugu Saabsan Ee lagu Darayo. Haddii aad oggolaatid, Kaqayb qaatayaasha aad u oggolaatid waxay geli karaan DHAMMAAN macluumaadkaaga caafimaadka eliktarooniga ah ee laga heli karo tooska HEALTHeLINK. Midaan waxaa kamid ah macluumaadka la sameeyay kahor iyo kadib taariikhda Foomkan Oggolaanshaha. Diiwaanada caafimaadkaaga waxaa kamid noqon kara xog taariikh ku saabsan xanuuno ama dhaawacyo aad hore u qabi jirtay (sida sonkor ama laf jaban), natiijooyinka baaritaan (sida Raajitooyin ama baaritaano dhiig), iyo liisas ku saabsan daawooyinka aad hore u qaadatay. Macluumaadkan waxay xiriir la yeelan karaan xaalado caafimaad xasaasi ah, ay ku jirto laakiin aanan ku ekayn:
 - Mushkilado isticmaal khamro ama daroogo
 - CUDURKA DILAAGA AIDS/FAYRASKA HIV
 - Xakamaynta dhalidda iyo ilmo ridista (qorshaynta qoyska)
 - Cuduro hiddo (la dhaxlay) ama baaritaano
 - Xaalado caafimaad dhimirka ah
 - Cudurada galmada la isaga gudbiyo
- Haddii aad qaadatay daryeel ku xad gudub khamro ama daroogo, diiwaanadaada waxaa kamid noqon kara macluumaadka la xiriira garashada cudurka ku xad gudubka daroogada ama khamrada, daawooyinka iyo qiyaasta daawooyinka, baaritaano shaybaar, cun-cun, taariikh isticmaal daroogo ah, taariikh jahwareer ama murugo, ka saaritaano isbitaal, shaqaalayn, taageerooyin bulshadeed iyo xaalad noolaansho, iyo taariikh sheegashooyin ceymis caafimaad.
3. Halkuu Ka Imaanayaa Macluumaadka Caafimaadka Adiga Kugu Saabsan. Macluumaadka adiga kugu saabsan waxay ka yimaadaan meelo lagaa siiyo daryeel caafimaad ama ceymis caafimaad ("Xogag Caafimaad"). Kuwani waxaa ka mid noqon kara isbitaalada, dhakhaatiirta, farmashiyeyaasha, shaybaaryada caafimaadka, bixiyayaasha ceymiska caafimaadka, barnaamijka Medicaid, iyo ururada kale ee eHealth kuwaas oo isku dhaafsada macluumaadka caafimaadka si eliktaroonig ah. Liis buuxa oo ka kooban Xogag Macluumaad hadda ah ayaa laga helayaa HEALTHeLINK waxayna ku jiraan boggaan internetka ah <http://wnyhealthelink.com/> ama adiga oo waca lambarkan 716- 206-0993 wicitaanka fog. 103.
4. Qofkee Geli Kara Macluumaadka Adiga Kugu Saabsan, Haddii Aad Bixisid Oggolaansho. Kaliya dhakhtarada iyo xubnaha shaqaalaha kale ee kamid ah Kaqayb qaataha(kaqayb qaatayaasha) aad u siisay oggolaansho in ay galaan kuwaas oo qabanaya hawlaha lagu oggolaaday foomkan sida kor loogu sharxay faqrada koowaad. Macluumaadkaaga sidoo kale waxaa geli kara ayada oo aan la haysanin oggolaanshahaaga Wakaaladaha Caafimaadka Dadweynaha haddii laga oggolaado dhinaca Gobolka iyo/ama Sharciga Federaalka. Macluumaad kasta oo laga helo dhinaca 42 C.F.R. Qaybta 2 xarunta loo qoondeeyay (daryeel bixiyayaal gaar ah oo bixiya daryeelka ku xad gudubka daroogada ama khamrada) waxaa kaliya la geli karaa marka uu jiro xiriir daryeel bixiye daaweyn ah. Liis buuxa oo ku saabsan Kaqayb qaatayaasha ayaa la helayaa waxayna ka ahaadeen HEALTHeLINK waxayna ku jiraan boggaan internetka ah <http://wnyhealthelink.com/physicians-staff/current-participants/participating-healthelink-providers/> ama adiga oo waca lambarkan 716-206-0993 wicitaanka fog. 103 haddii aad doonaysid nuqul adag oo aan wax lacag ah kuugu fadhin ayaad ku helaysaa gudaha 5 maalmood ganacsi oo laga joogo codsiga.
5. Ciqaabta loogu talagalay Gelid Aan Munaasab ahayn ama Istimaal Khaldan oo la isticmaalo Macluumaadkaaga. Waxaa jira cigaab loogu talagalay gelida aan munaasabka ahayn ama isticmaalka la isticmaalo macluumaadkaaga caafimaadka eliktarooniga ah. Haddii wakhti kasta oo ay noqoto aad ka shakisid in qof aanan ahayn in uu arko ama galo macluumaadka adiga kugu saabsan uu galay ama arkay, wac mid kamid ah Kaqayb qaatayaasha aad adigu oggolaatay in ay galaan diiwaanadaada; ama ka booqo bogga internetka HEALTHeLINK halkan <http://wnyhealthelink.com/>; ama ka wac HEALTHeLINK lambarkan 716- 206-0993 wicitaanka fog. 103; ama ka wac Waaxda Caafimaadka Gobolka New York lambarkan 518-474-4987; ama kala soco hawsha cabashada lagu cabaado Xafiiska federaalka ee loogu talagalay Xuquuqaha Rayidka linkigaan soo socda: <http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/>.
6. Dib-usii deynta Macluumaadka. Kaqayb qaate(kaqayb qaatayaal) kasta oo aad u siisid oggolaansho in ay galaan macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan waxay dib-usii deyn karaan macluumaadkaaga caafimaadka, laakiin kaliya waa xadka laga oggolyahay dhinaca gobolka iyo sharciyada federaalka iyo xeerarka. Macluumaad daaweyn-xiriir la leh khamro/daroogo ama macluumaad xiriir la leh-HIV oo sir ah ayaa kaliya la geli karaa oona dib-loo sii deyn karaa haddii ay la socdaan bayaanada loo baahanyahay ee khuseeya mamnuucida dib-usii deynta.
7. Muddada Dhaqan Galka. Foomkan Oggolaanshaha wuxuu ahaanayaa mid shaqeeya illaa maalinta aad ka bedeshid doorashadaada oggolaansho ama illaa wakhtiga HEALTHeLINK ka joojiso hawsha (ama illaa 50 sanno kadib marka aad dhimmatid mida soo hormarta). Haddii HEALTHeLINK ku darsanto Hay'ad kale oo U qalanta doorashooyinka oggolaanshaheena waxay ahaan doonaan kuwo ku shaqeeya hay'ada cusub ee lagu daray.
8. Bedelida Doorashadaada Oggolaanshaha. Waxaad bedeli kartaa doorashadaada oggolaanshaha wakhti kasta iyo Urur Daryeel bixiye kasta ama Qorshe Caafimaad adiga oo soo dira Foom Oggolaansho cusub oo ku qorantahay doorashadaada(doorashooyinkaaga) cusub. Kaqayb qaataha(kaqayb qaatayaasha) ka galaya macluumaadkaaga caafimaadka tooska HEALTHeLINK marka uu oggolaanshahaagu shaqeeyo waxaa dhici karta in ay nuqul guuriyaan ama ku daraan macluumaadkaaga diiwaanadooda caafimaadka. Xitaa haddii aad dib ka go'aansatid in aad bedeshid go'aankaaga oggolaanshaha ayagu loogama baahna in ay soo celiyaan macluumaadkaaga ama ka saaraan diiwaanadooda.